# WAXKABASHADA LAYSKA RABO SIR-QARINTA BANGIGA

*Buugga Tilmaanta Kooban ee Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed.*

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falal Dambiyeed La Xiriira Maaliyadda.
Waaxda Hantidhowrka Dawladda Mareykanka.
Washington D.C.

## Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga

Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga waxaa ansixiyay Golaha Kongareeska sanadkii 1970 si loo dhabargooyo lacagta la dhaqay iyo falal dambiyeedka la xiriira maaliyadda.

Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga waxaa looga baahan yahay hay'adaha ku howlan arrimaha la xiriira maaliyadda iney hayaan warqado la tixraaco, xusus dhowr Iyo faylasha warbixinta ee la xiriira fulinta heshiisyada ganacsi . Warbixinnadasi waxaa loo soo bandhigaa Waaxda Hantidhowrka Dawaladda Mareykanka, Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falal Dambiyeedka La Xiriira Maaliyadda(FinCEN). FinCEN waxay soo uruurin , waxayna ku sameyneysa baaritaan warbixinnada iyagoo siinayo taageerid dadaalka hirgelinta sharciga baaritaanka iyo si loo siiyo Mareykanka kuwa ku howlan siyaasadda waddanka baarid xeelad ku jirto gudaha iyo adduunweynaha dhaqdhaqaayada lagu dhabargoynaya horumarinta lacagta la dhaqay , jihadeeda iyo hannaankeeda.

Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) warbixinteeda iyo diiwaangelinteeeda waa shuruudaha lagu dabakhayo bangiyada, bangiyada keeydadka iyo amaahyada iyo Kareedid Union iyo xittaa hay'adaha ku howlan maaliyadda, ay ku jiraan Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB).

*Taasoo u sii dheer, tilmaamaha guud oo laga bixiyey halkan, waxyaabaha kale ee ay u baahan tahay waxaa laga yaabaa in lagu dabakho kuwa ku qeexan Adeegyada Sameeyo Shaqo Ganacsi Lacageed. Fadlan fiiri http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/ oo aad ka heleysid xeeraar iyo macluumaad dheeraad ah.*

*Haddii aad dooneysid macluumaad dheeraad ah , fiiri buugga yar oo cinwaankiisu yahay " Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinayo : Buugga Tilmaanta Kooban Ah ee Adeegyada Sameeya Shaqo- Ganacsi Lacageed"*

# XUSUUSHAYNTA LAYKA TABO

## Warbixinnada Macaamil Lacageed

Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB), waa iney u fayl-gareeyaan Warbixinnada Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) 15 maalmood gudaheeda sikastaba ha ahado macaamilka hal amba kuwo taxan oo isku jiro:

- Kuwa khuseya $10,000 doolar iyo in ka badan lacag caddaan ah oo la soo xareeyo ama baxdo, iyo
- Oo qabtay isla qofkii ama qof matalaya isla qofkii, iyo
- Iyadoo la sameeyey isla hal maalin ganacsi gudaheed.

Macaamilo badan ee ganacsi oo lacag caddaan ah waxaa loo tixgelinayaa inay tahay hal macaamil ganacsi lacageed oo la doonayo in loo fayl-gareeyo CTR. marka Adeegyadda Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed ay ogaadaan:

- Inuu macaaamilka yahay ama uu matalayo qof kale oo ah isla macaamilkaasi islamaalin ganacsi gudaheed, iyo
- Ama waxaa lagu qabtay hal ama dhowr laamo badan ama wakiilo isla Adeegyada MSB, iyo
- Ama isugeynta oo ahaan kartaa in ka badan $10,000 doolar ha ahaato lacag caddaan ah oo soo gashay ama ka baxday.

## Sidee Loo Faylgareeya Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR)

1. Hubso ee Diiwaangeli Aqoonsiga Macaamilka.
2. Diiwaangeli warbixinta xawaaladda macaamilka sameeyey.
3. U sameey nuqul warbixinnada xawilaadda lacagta.
4. U dir asliga warbixinnada xawilaadaha lacagta:
   IRS Detroit Computing Center
   Ku socoto: CTR
   P.O. Box 33604
   Detroit, MI 48232-5604
5. Xafid nuqulka warbixinta xawaaladda lacagta illaa iyo 5 sano laga soo bilaabo maalintii la faylgareeyey.

## Ku Iiبsasho Lacag Caddan ah ee $3,000- $10,000 doolar iskudarkooda

Adeegyada MSBs ee iibinaya jeegagga wareega ama jeegagga socotada waxaa laga rabaainay diiwaangeliyaan gadashada lacagta caddaanka ku jirta $3,000- $10,000 doolar , isku darka guud,

Iibsasho badan ee aalaabo lacageed iskugayntooda tahay $3,000 doolar iyo in ka badan waa in loo tixgeliyaa sida hal iibsasho, waana in la diwaangeliya haddi:

1. Ay taasi la sameeyay iskumar, ama
2. Adeegyada MSB ay ogyihiin inay iibsashadaasi dhacday isla hal maalin-ganacsi gudaheed.

Sidee loo diiwaangelinayaa iibsadasha oo lacag caddaan ah jeega wareega ama jeega socotada ee lacag caddaan ah $3,000-$10,000 doolar, iskujirkood.

1. Hubi ee diiwaangeli macluumaadka macaamilka, taaso ku jirto aqoonsiga.
2. Diiwaangeli macluumaadka xawaaladda-tirada, taariikhda iibinta iyo nambarrada taxan ee aalaabo lacageed kasta.
3. Xafid diiwaangelinta illaa 5 sano laga billaabo taariikhdii macaamilka xawaaladda la sameeyey.

## Xawilaad Lacag Ee $3,000 Doolar Iyo In Kabadan

Adeegayada MSB oo sameeynayo xawilaad lacag waa iney hayaan diiwaangelin qayaxan iyo macluumaad xawilaad kasta ee $3,000 doolar ama wax kabadan,iyadoon loo tixgelinin qaabka lagu bixiyay xawilaadda. Sida loo diiwaangeliyo xawilaad lacag $3,000 doolar ama in kabadan wax ka badan ee dadka diraya ama dadka qaadanayo:

Sida loo diiwaangeliyo xawilaad lacag $3,000 doolar ama in kabadan wax ka badan ee dadka diraya ama dadka qaadanayo:

1- Hubi aqoonsiga qofka macaamilka.
2- Diiwaangeli macaamilka iyo macluumaadka xawaaladda.
3- Qofka dirayo waa inuu siiyaa macluumaad qaarkood Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed ama hay'adaha ku howlan maaliyadda.
4- Xafid diiwaangelinta illaa 5 sano laga soo bilaabo maalintii la sameeyey macaamilka xawaaladda.

## Isku Beddelista Sarrifka Lacagaha in Ka badan $1,000 doolar .

Dadka sameeya isku beddelista sarrifka lacagaha waa inay hayaan diiwaangelin sarrifaad walbo isku darka guud wixii ka badan illaa iyo $1,000 doolar ha ahaato lacagta gudaha ama lacagta qalaad.

Sidee loo diiwangelin isku beddelista lacagaha:

1. Diiwaangeli macluumaadka qofka macaamilka ah.
2. Diiwaangeli macluumaadka macaamilka ganacsi oo la sameyay.
3. Xafid diiwaangelinta illaa 5 sano laga soo billaabo taariikhdii la sameeyey macaamilka ganacsi.

## Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinayo oo Layskarabo

Kuwo qaarkood oo sameeya adeegyada shaqo ganacsi lacageed, adeegyada sameeyo xawaaladaha ama iskubedelista lacagaha; ama shaqo ganacsi oo ku lug leh iibinta ama dibugadashada jeegagga wareega ama jeegagga socotada -waa inay soo wargeliyaan dhammaan falal kasta oo laga shakin karo taasoo lug ku leh macamilka ganacsi kasta ama nidaam macaamil oo ah ama ka badan tirada qaarkeed:

- $2,000 doolar ama in kabadan
- $5,000 doolar ama in kabadan ee dadka soo saaraaya oo sameeynaayaa dib u eegidda diwaangelinta

Waxaad qabtaa 30 maalmood oo aad ugu faylgareysid Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinayo (SAR) markaad ogaatid wax allaa wixii shaki ah ee u baahan in la wargeliyo.

## Sidee loo Wargelin Falalka laga Shakiyo

1- Ku diiwaangeli warbixinnada macluumaadka foomka (MSB-SAR) oo oo laga heli karo http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/ ama wac IRS Xarunta Qaybinta Foomamka: 1-800-829-3676
2- U bandhig warbixinta dhameystiran Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinayo (SAR):
Detroit Computing Center
Attn: SAR-MSB
P.O. Box 33117
Detroit, MI 48232-5980.
3-Xafid nuqulka warbixinta iyo wixiii dokumentooyin ah ee taageerayo illaa 5 sannadood laga soo bilaabo taariikhdii la faylgareeyey warbixinta.

## Waxkaqabatka Layskarabo Sirqarinta Bangiga oo laga doonayo Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed ee Kooban.

- Diiwaangelin- Kuwa qaarkood ee Adeegyada MSB waa inay diiwaangeliyaan oo ay hayaan liis wakiilo, haddii uu jiro.
- Haddey adeegyada MSB ee ay ogaal u yihiin ama ay qaban sabab ay ku shakiyaan inuu macaamil ganacsi lacageed shaki ku jiro ama lug ku leeyahay hanti isku jirto ama raasumaal kale oo $2,000 doolar ama in ka badan ($5,000 oo doolar ama in kabadan haddii uu aqoonsado qofka sameeyey dib u hubinta xaqiijinta diiwaangelinta) waa in loo fayl-gareeyo.Falalka Shakiga Dhalinaya.
- Barnaamijka U Hoggaansanaanta Dhabargoynta Dhaqidda Lacagta (AML)- Dhamman Adeegyada MSBs, waxaa laga rabaa iney horumariyaan ee fuliyaan Barnaamijka AML.
- Haddii Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed, ay soo geliyaan ama ay bixiyaan $10,000 doolar ama macaamilo ka badan isla hal qof macaamil ah hal maalin gudaheed, waa in loo faylgareeyaa Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR).
- Haddii adeegyada sameeyo shaqo ganacsi lacageed ay soo saaraan jeega wareega ama jeega socotada lacag caddaan ah $3,000 - $10,000 iskudarkood, ee ay u sameeyaan isla macaamilkii, isla maalin gudaheed, waa inay keydiyaan diiwaangelin.

- Haddii Adeegyada MSB ay u sameeyaan xawaalad lacag oo dhan $3,000 doolar ama ka badan isla macaamilkii maalin gudaheed iyadoon la tixgelin habka bixinta waa in la diiwaangeliyaa.
- Haddii Adeegyada MSB ay siiyaan isku beddelid lacageed in ka badan $1,000 doolar isla macaamilkii isla hal maalin gudaheed waa in la diiwaangeliyaa.

Jawaabta su'aalahaaga oo ku saabsan Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiyada iyo keydinta diiwaangelinta, fadlan fiiri http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/.

Ama wac:

Detroit Computing Center Hotline
1-800-800-2877

FinCEN Regulatory Helpline
1-800-949-2732

Si aad u dalabtid tilmaamo bilaash
1-800-386-6329

Si aad uga dalabtid Foomamka Waxkaqabdka Layskarabo Sirqarinta Bangiga
IRS Forms Distribuition Center
1-800-829-3676

*Buuggani waxaa loola jeedaa sida tilmaame guud ee hoos imanayo 31 CFR Qaybta 103.*
*Buuggani ma aha beddelid ama ku beddelid xeerarka.*

The Campaign AGAINST Financial Crimes